

SHAQADA OO LAGAA FASAXO SI AAD U CODAYSO



Waxaad xaq u leedahay in shaqada lagaa fasaxo si aad u codayso, adiga oo aan lagaa goynayn lacag, fasaxa gaarka ah, ama fasax aad xaq u yeelatay.

Looshaqeeyahaaga waxaa waajib ku ah in uu bixiyo waqtiga aad u baahan tahay in aad ku codayso, haddii waqtigaasu ku soo aado jadwalkaaga shaqada. Looshaqeeyahaagu shuruud kaagama dhigi karo in aad isticmaasho fasaxa gaarka ah, ama fasax aad xaq u yeelatay.

Isticmaal oo kaliya waqtiga aad u baahan tahay in aad ku codayso oo shaqadaada aad.

Looshaqeeyahaagu si toos ah ama si dadbanba kuuguma diidi karo, xadidi karo, ama faragelin kuma samayn karo xaqqaan, oo ay ka jirto in aad codaysid waqtiga aad doorato.

Looshaqeeyahaagu waa ku waydiin karaa in aad u sheegto marka aad tegaysid, iyo in uu waydiisto in shaqaaluhu isuduwaan waqtigooda si maqnaanshahoodu aanu u carqaladayn shaqada.

Waxaad xaq u leedahay in shaqada lagaa fasaxo si aad u codayso dhammaan doorashooyinka federaalka iyo gobolka, iyo dhammaan doorashooyinka deegaanka ee leh jadwal joogto ah.

waa socotaa eeg bogga gadaale...

Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
mnvotes.org • 1-877-600-VOTE

SHAQADA OO LAGAA FASAXO SI AAD U CODAYSO



...ka timid horay

CABASHOYINKA

Looshaqeeyaha sharcigan ku xadgudba waxaa lagu helayaa dembi fudud. Wixii cabashooyin ah ee ka imanaya shaqaalaha waa in loo gudbiyaa xeerilaaliyaha degmada.

HORAY UGU CODAY WARQADDA CODBIXINTA MAQANAHA

Horay ayaad uga codayn kartaa xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga laga bilaabo Jimce 21ka Bisha 9aad (September), xafiiska doorashada ee deegaankaaga ayaad horay ugu codayn kartaa warqadda codbixinta maqanaha . Waxaad kaloo codsan kartaa in boosta laguugu soo diro warqadda codbixinta maqanaha .

Si aad u heshid xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga ama aad u codsatid warqadda codbixinta maqanaha , booqo mnvotes.org

WARQAD LOOGU TALAGALAY LOOSHAQEYHAAGA

Booqo mnvotes.org si aad u hesho warqad aad siin karto looshaqeeyahaaga una faahfaahinaysa xaqqa aad u leedahay in shaqada lagaa fasaxo si aad u codayso.

TAARIKHAHA 2022

DOORASHADA AASAASIGA
Talaada, 9ka Bisha 8aad (August)

MAQNAANSO KU CODAY
Coday adigoo boostada ku soo diraya ama qof ahaan imanaya 23ka Bisha 9aad (September) ilaa 7da Bisha 11aad (November).

**ISDIIWAANGELI SI AAD U
CODAYSO**
Hory isudiiwaangeli ugu dambayn 18ka Bisha 10aad (October) si aad waqti u hesho Maalinta Doorashada.

MAALINTA DOORASHADA
Talaada, 8da Bisha 11aad (November)



Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
mnvotes.org • 1-877-600-VOTE